BARWAAQADA LA CAASIYO ILAAH WAA BURBURIYAA

Gabaygani wuxuu ka hadlayaa arrin dhowaantan ku soo korortay degaamada Puntland taasoo ah in dadkii EEBBAHA ay weydiisanaayaan inuu cayreeyo oo xoolaha dhaafiyo si ay u helaan badar suus leh tiiyoo baryadii laga rabo oo qura gacmaha gaalada iyo kuwa isugu yeera deeq bixiyayaaasha.

Ka gadaal markii uu da'ey roobkii barafka lahaa iyo Badgariirkii dhacay dabayaaqadii sannadkii hore waxaan la soconaa in meel kasta oo ah magaalo laami ku taal, kuwa la ollogga ah iyo kuwa xeebaha ku dhereran-ba laga dhisay bush cayreedyo lagu muujinayo inay tahay saamayn ka dhalatay roobabkii iyo badgariirkii.

Arrimahaas markaan arkay ayaan soo xasuustay gabay hadda kahor abwaan reer Puntland ah oo la yiraahdo Kabtan, kuna noolaa ogaantaydii tuulada Qoyan ee gobolka Sanaag-bishii July 2005- uu tiriyey xilli uu arkay qolo u qayshanaya/gacan haadinaya dhibaato aan hayn xilligaas oo ku begeenyad dabayaaqadii siddeetamaadkii ee qarnigii tegey ciwaankiisuna ahaa kan sare ku qoran, marka isagii ayaan mar labaad ciwaan ahaan u qaatay anigoo gabayga ku muujiyey beydkaasi inuu yahay gabay nin kale lahaa ee anigu aanan lahayn waana hab ku bannaan kala xigashada gabayada, maaddaama labada gabay isku ujeeddo yihiin ayse soo kalabaxeen laba xilli oo kala duwan kalana khuseeyaan laba degaan oo kaladuwan waxay wadaagi karaan magaca sida gabayadii Deelley,Guba, Siinley iwm.
Waxaa kale oo gabayada in cinwaanka ay wadaagi karaan iyadoo muddadii la tiriyey kala durugsan tahay aan ka qaadan karaa Gabayadii ay isugu jawaabeen iyagoo aan nolol isku soo gaarin Allaha u wada naxariistee Aw Yuusuf barre iyo C/Qadir Xersi Yamyam ee la oran jirey Guur an ka la'aado.
Waxaa sidoo kale maanso la oran jirey roob doon nabad doon nabad iyo roob doon oo uu tiriyey Allaha u naxariistee Abwaan yamyam iyaduna ka hadlaysey Baryada Hay'adaha lala beegsanayo.

1. Berigaad ladnaatiyo kolkay belo ku gaartaaba
2. Baabacada waxa loo dhigtaa boqorki weynaaye
3. Cidkalood baryada ula tagataa waa badownimo'e
4. Kolkii aan Puntland eegay oo dhab u bacxnaaneeyey
5. Sida haatan loo badan yahaan lagu badbaadayne
6. Iimaanki oo bololay iyo waa bar kuma taale
7. Qarankii markuu naga burburay baaba' dhaqankiiye
8. Bilaash xoolo lagu helo dadkaan hay'adaa baraye
9. NGO'ga beenta ah kolkii aan ku bahalowney
10. Een weyney waa boob wax dhaha ee hallaga bayro
11. Mashaariic bilaashana la helay badina xaaraana
12. Wixii loo baxshiyo wuxu ku baxay yaa ah kalabaabe
13. Bush cayreedyo beenoon dhisnaa loo bannaan baxaye
14. Waxaan hawshan buunbuuninnay oo aad u sii badinnay
15. Badgariirku goortuu dhiciyo barafle roobkiiye
16. Bog adduunyo niman haysan oo baahan ama liitaa
17. Baddu nimay ku soo guurtey oo dumisey beydkiisi
18. Inuu buul dhistoo hoosgalaa waw bannaan tahaye
19. Dad aan barafle meeluu qabtiyo aan badarag waana
20. Ayaa degay balbala fool xun oo diin barkiis le'eg
21. Caku sida barwaaqada Ilaah an uga been sheegnay
22. Caku bacaha aan waabanniyo buulal foolxumada
23. Caku belo saraadsiga shacbiga ba' iyo hoog doonka
24. Caku meel bisadi aanay gelin toban qof biilkood dhig
25. Caku beretankaan loogu jiro yaan lagaa badinta
26. Caku waxa bagcado loo cabbiray reer an abid baahan
27. Caku badarka suuska leh waxaan daal ku bixinayno
28. Caku been wax lagu helay inay boolitahay moogga
29. Caku waxa bilcaan quruxlahayd boor qayiray foolka
30. Caku sida baryada looga rabo gaal isagu baahan
31. Bog adduunyo iimaanu harin buriyo khayr moodka
32. Beyddi iyo ladnaantaan qabniyo beliyo cayr doonku
33. Waa baaddil xoogaystey iyo been isugu faane
34. Beri qoon u baahdeen dhib aan joogin beledkooda
35. Ba'ley tixa abwaan baa ku yiri baydka gabaygaan
36. Barwaaqada la caasiyo Ilaah waa burburiyaaye

37.Wixii ay baryaayeen Rabbigu kuma bakhaylayne
38.Burburkii qabsaday saacaddaas may bogsoon weliye
39.Afartaas bilaash lama gabyee beyd runoo jira dheh
40.Marinkii ku beegnaa shacbiguu suu u baal maraydheh
41.Haddana biyadhicii iyo runtiyo bayd dardaarana dheh
42.Barwaaqada haddaan lagu shukriyin Eebbeheen bixiyey
43.Barbarkaa waxaa laysu dhigi belelki Naareede
44.Beenna Maaha ee waxay ku taal Baalasha Qur'aane
"LA'IN SHAKARTUM LA'AZIDANNAKUM
WALA'IN KAFARTUM INA CADAABII LASHADIID"(SCC)
45.Munkarkan baahay culumadu hadday beenin kariweydo
46.Barqo iyo dharaar anay wacdiyin shacabkan baadyaystay
47.Wixii banu-israa'iil qabsaday bay la baab noqone
48.Beenna maaha ee waxay ku taal baalasha qur'aane
KAANUU LAA YATAAHOWNA CAN
MUNKARIN FACALUUH…..(SCC)
49.Hadday madaxdu buunbuunisoo badarka doondoonto
50.Ama aanay belo saadsashada beenin karahaynin
51.Bush cayreedka beenta ah haddii ay burburin weydo
52.Billaahiye xilkii loo igmaday baylahshoo dhigee
53.Beenna maaha ee waa xaddiith sugane soo baara
MAN RA'AA MINKUM MUNKARAN FALYU
QAYIRHU BIYADIH
54.Berritana su'aal baa hortaal beydka aakhiro
55.Beenna maaha ee waa xadiith kale'e soo baara
KULUKUM RAACIN WAKULUM MAS'UULUN
CAN RACIYATIH
56.Waxba gabaygu yuu ila baxsane waan bojinayaaye
57.Boqorro iyo culimiyo shacbiga odayo beeleedka
58.Xil bulshood in haysiyo abwaan jeedin kara beydad
59.Haddaynaan bareer uga hortegin xumahan baahaaya
60.Oo aynaan baryiyo toobadkeen baarigaw celinin
61.Asii aan Ilaah inaku bixin boqor ahaantiisa
62.Wixii Eebbahay laga baryaa maaha buur culuse
63.Wallee belada loo soo godladey beydka waw halise!!!!!!!!!!!

Waxa tiriyey MMX- Gaani, MAY, 2005
Tel: 2525755782/2525441743
Emai: mmhgani@yahoo.com